

Soomaali/Somali/Somaliska

Tani waa Sommarlund

Muusig, riwaayad, qoob-ka-ciyaar, suugaan, farshaxan, aqoon isweydaarsiyo iyo madaddaalo kala duwan oo la tijaabinayo – Sommarlund waa boqolaal waxyaalood oo dhaqan ku lug leh oo la isku mashquuliyo oo loogu talagalay da' kasta, degamada Lund oo dhan, xagaagaan oo dhan.

Ku dhawaad wax walba waa bilaash, waxayna inta badan ka dhacayaan bannaanada, afartameeyo meelood oo kala duwan. Mararka qaarkood masraxyo waaweyn, mararka qaarkoodna barxado cawsleey ah. Had iyo jeer meelo kuu dhow.

Halkaan ayaad barnaamijka ka heleysaa

Barnaamijka Sommarlund waxaad ka heli kartaa boggeena internet ee sommarlund.se. Qodob kasta oo barnaamijka ka mid ah waxaa faahfaahintiisa lagu helayaa af-iswiidhish iyo af-ingriis labadaba.

Waxaan sidoo kale diyaarinay barnaamij daabacan oo af-iswiidhish ku qoran. Waxaana laga soo qaadan karaa Turistbyrå (Xaafiiska Dalxiiska) ee ku yaal Stortorget ama maktabadaha Lund dhammaantood.

Bilaash ayaa inta badan lagu galaa

Barnaamijku intiisa badani waa bilaash oo lama sii dalban karo, laakiin waa inaad timaadaa wakhti hore! Haddii masraxyada qaarkood aysan bilaash ahayn ama ay tahay in la isa sii diiwaangeliyo waxaa warbixintaas laga helayaa qoraalka ku aaddan qodobka barnaamijka.

Isbeddelada barnaamijka

Asbaabo kala duwan dartood waxaan ku khasbanaan karnaa inaan barnaamijka wax ka baddelno wakhti gaaban ka hor. Caado ka dhigo inaad had iyo jeer booqato boggeena internet ama kan facebook intaadan masraxa soo aadin ka hor.

Halkaan ayaad goobaha masraxyada ka heleysaa

Bogga sommarlund.se waxaa ku taal khariiddada goobaha masraxyadeena.

Martisoorayaal xagaa

Masraxyadeena intooda badan waxaa inay su'aalo ka jawaabaan, qoraalka barnaamijka qeybiyaan oo dadka sidoodaba u caawiyaan jooga martisoorayaal gaar ah.

Taakulo

Ma dooneysaa inaad barnaamijka cod CD ku duuban ku hesho, ama haddii araggaagu ama maqalkaagu xun yahay lagu turjumo? Ma jiraan su'aalo aad qabto ama xaalado qabanqaabada la xiriira inaad gacan uga baahan tahay? Nala soo xiriir, waanu ku caawimeynaaye. Martisoorayaasheenuna waxay sidoo kale goobta u joogaan inay ku caawiyaan.

Xiriir

Sommarlund waxaa abaabulaya maamulka degmada Lund ee arrimaha dhaqanka iyo madaddaalada (Kultur- och fritidsförvaltningen) iyadoo uu iskaashi dhow ka dhexeeyo qabanqaabiyeyaal kale oo farabadan.

Telefoon: 046-359 71 25

E-boosto: sommarlund@lund.se

Cinwaan boosto:

Sommarlund
Kultur- och fritidsförvaltningen
Box 41
221 00 Lund

Cinwaan booqasho:

Kultur- och fritidsförvaltningen
Stora Södergatan 47
221 23 Lund

Sommarlund.se
[@sommarlund.se](https://www.facebook.com/ArrangemangLund)